# Ma Ka heli karaa Adeegyo SSB?

Can I Get Services from SSB?

## Waa maxay SSB?

Sharciga Xirfadeynta Naafada ee Dowlada Dhexe (Rehabilitation Act) waxa uu leeyahay lacagta waa khasab in loo isticmaalo adeegyada tababarka xirfadaha ee dadka naafada ah. Adeegyadaasi waxa ay kaa caawin karaan inaad shaqo hesho ama sii wadato. Minnesota, Hay'ada Adeegyada Gobolka ee Indhoolayaashu [State Services for the Blind (SSB)] waxay u fidisaa adeegyo dadka indha la' ama indhaha sida fiican aan wax uga arag ee doonaya inay shaqaystaan.



## Ma heli karaa adeegyo?

Inta badan, xaq ayaad u leedahay inaad hesho adeegyada ay bixiso SSB hadii aad:

1. Hadii indhaha aadan si fiican wax uga arag. Taa oo loo qeexo:
   - Indho curdoonaan 20/60 ah ama ka yar isha roon iyadoo leh toosin ugu fiican
   - Maqnaanta ugu yaraan hal gabal oo buuxa ee qalabka bidhaaminta araga **ama**
   - Cudur jirka ah ama aragtida oo mar walba hoos u sii dhacda, taasoo keenta indho-la'aan aakhirka

   **iyo**

2. Inaad u baahan tahay adeegyada tababarka xirfadaha si aad diyaar ugu noqoto inaad shaqo hesho aadna sii wadato shaqadaa

   **iyo**

3. Inaad ka faa'iidi kartid adeegyada tababarka xirfadaha.

Markiiba xaq aad u leedahay hadii aad qaadato Dakhiga Kaabaha ah ee Sooshal Sakuuratiga (SSI) ama kan Caymiska Naafada ee Sooshal Sakuuratiga (SSDI) sababatoo ah aragti la'aanta.

Hadii hay'ada SSB ay go'aansato inaadan ka faa'iidi karin adeegyada sababtoo ah naafadanimaada oo aad u culus awgeed, waa khasab inay taa cadeeyaan " iyagoo soo bandhigayda daliilo cad oo shaki la'aan ah."

## Cid walb oo xaq u yeelataa ma heshaa caawimaad?

Nasiib-darro, SSB runtii ma laha dhaqaale ku filan si ay ugu adeegto qof <u>walba</u> oo xaq u leh. Waxa ay go'aansada cidda ay marka ugu horeeysa caawinayaan iyagoo isticmaalaya "Hab Xulasho ah" Taa macnaheedu waa dadka qaarkii adeegyada waxa u helaan si ka dhaqso badan dadka kale. Waxayna ku xiran tahay taasi sida ay u kala xunxun yihiin naafanimadoodu. Habka Xulashada ahi waxa uu ka hormariyaa dadka naafada ugu daran leh dadka kale ee aan naafanimadoodu aadka u darnayn.

Dadka naafanimada ugu yar lehi waxaa dhici karta inaysan helin adeegyo gabi ahaanba, aan ka ahayn in barnaamijka SSB du uu hayso dhaqaale uu cid walba ugu adeegi karo.

## Waa maxay Naafanimada darani?

Waxa aad leedahay **naafanimo daran** hadii:



1. naafanimadaadu ay ka dhigto wax aad u adag mid ama in ka badan oo ah waxyaabahan soo socda:

   - meelo isaga socodka
   - la hadalka iyo dhagaysiga dadka kale
   - daryeelida naftaada
   - sameysiga iyo fulinta qorshayaal
   - u akaysiga shaqo (waxaad u baahan tahay gacanqabad si aad shaqadaada u guduto)
   - lahaanshaha xirdafo shaqo si aad u shaqaysato
   - la heshiin dadka kale

   **iyo**

2. waxa aad u baahan tahay in ka badan hal adeeg muddo dheer si aad ugu diyaar garowdo aad u hesho aadna u sii hayso shaqo.

   **iyo**

3. marka laga reebo arag xumadaada, waxaad kaloo leedahay naafanimo jireed am mid maskaxiyan ah ama dhowr naafanimo oo isku jira oo keena waxqabsi xummo culus.

## Habka kala Xulashada

Habka kala Xulashada ee SSB waxa uu ka kooban 3 Jaad. Waxa ayna eegaan awoodaada marka ay noqoto natiijada shaqada. Dadka ku jira jaadka A ayaa ugu horeeyn adeegyada hela.

– **Jaadka A:**

Kuwani waa dadka naafanimada ugu weyn leh. Kooxda waa aad ku jirtaa hadii aad leedahay waxqabsi xummo aad u culus oo ah **5 ama in ka badan** oo ah waxyaabahan kor lagu xusay.

– **Jaadka B:**
Kooxda waa aad ku jirtaa hadii aad leedahay waxqabsi xummo aad u culus oo ah 3 ama 4 ah waxyaabahan kor lagu xusay.

– **Jaadka C:**
Kooxda waa aad ku jirtaa hadii aad leedahay waxqabsi xummo aad u culus oo ah **2 ama in ka yar** oo ah waxyaabahan kor lagu xusay.

Iyadoo hadba ku xiran dhaqaalaha, dadka ku jira Jaad A ayaa mid marka ugu horeeysa loo adeegaa. Jaad walba dadka ku jira waxaa loogu adeegaa sida ay u soo kala horeeyaan, iyadoo la eegayo taariikhda codsiga.



Kolka barnaamijka SSB uu go'aansado inaad xaq u leedahay, waxaa lagu gelin jaadka ugu koreeya ee aad xaqqa u yeelato iyadoo la eegayo akhbaarta ay hayso SSB ee adiga kugu saabsan. SSB waa inay ku siiso sharaxaad adigoo xaadir ah iyadoo qoran sababta laguu geliyey jaadkaaga iyo jaadka iminka loo adeegayo.

Kolkii lagu galiyo jaad, lagaama saari karo aan ka ahayn in wax iska bedelaan naafanimadaada taa oo ku gelin karta jaadka ka koreeya kan hadda aad ku jirto. Hadii aad is leedahay xaaladaada caafimaad waa ay ka soo daraysaa, u ogaysii SSB sida si ugu dhaqsaha badan si kolkaa looga yaabo in laguu geliyo jaad mudnaan sare leh hadii ay suurta gal tahay.

Cidii aan ka soo bixin shuruudaha Habka kala Xulashada waxa uu isticmaali karaa akhbaarta SSB ga iyo nidaamkeeda gudbinta. Wixii akhbaar ah ee ku saabsan meekhaanada Habka kala Xulashada barnaamijka SSB ka ama wixii liis sugitaan ah, kala xiriir SSB.

## Sidee ayaan u codsan karaa?

1. Waa khasab inaad qoraal ahaan ku codsato adigoo warqad qoraya ama u diraya foomka codsiga oo buuxsan barnaamijka SSB.
   Si aad u hesho codsi, wac:

   - (agagaarka beledyada): (651) 539-2300
   - Khadka Lacag La'aanta ah: 1(800) 652-9000

Waydii inaan la hadasho qof ka tiran Qaybta Horumarinta Shaqo-ku-jaynta.

Waxaad kaloo isticmaali kartaa khadka (online) ee codsiyada akhbaarta ee https://mn.gov/deed/ssb/about/contact/locations/ssbinfoform.jsp.

Waa khasab inaad saxiixido foomka "bixinta akhbaarta." Taasi waxay u ogolaan barnaamijka SSB inuu helo akhbaartaada caafimaad si u uu cadeeyo inaad indhaha naafo ka tahay.

**2.** Arrimaha intooda, la taliyaha SSB ku waxa uu kugula kulmaa adiga bil gudaheed kolka aad codsiga xareysato. La taliyahu waxa uu kuu sharxi kolkaa hanaanka xirfadaynta iyo mashaariicda kala duwan ee uu fidiyo barnaamijka SSB. Waxaa kaloo dhici karta inaad u baahato inaad ka qaybgasho fadhi akhbaar aqoon-iswaydaarsi ah oo ku saabsan adeegyada SSB.

La taliyahu waxa uu ku waydiiyaa adiga wixii akhbaar ah ee uu u baahan yahay si ay u ogaadaan xaq u yeeladkaaga. Waxay noqon karaan waxyabaha tarriikhdaada shaqo, tacliintaada, tababaradaada, awoodahaaga iyo xiisahaaga, baahida xirfadeynta, iyo hadafyada meheradaha suurta gal ah.


Kolka uu soo aruurinayo akhbaarta, barnaamijka SSB waxa uu eegaa akhbaarta jirta intii la awoodo. Hadii taasi aysan ku filnayn in la go'aansado xaq u yeeladka adeegyada, barnaamijku waxa uu kala shaqeeyaa adiga sidii laguugu heli lahaa akhbaarta kale ee uu u baahan yahay. Hadii uu jiro wax kharash ah oo ku baxaya helida akhbaartaa, waxa aad waydiisan kartaa barnaamijka SSB inuu isagu bixiyo.

Go'aamada intooda badan waxaa lagu gaaraa 60-cisho gudahood laga bilaabo maalinta codsiga aad keentay. Hadii waqti kale loo baahdo, SSB waa inay adiga kula hadashaa si kolkaa labadiinuba aad u wada gaartaan heshiis ku saabsan waqti kordhinta.

## Hadii laguugu Diido Adeegyada

hadii SSB ay diido codsigaaga adeegyada ama ku geliso jaad mudnaan ah oo ka hooseeya kuwa iminka loo adeegayo, waa khasab inay kuu soo diraan warqad kuu sheegaysa:

**1.** Sababta laguu diiday ama laguu geliyey jaadka lagu geliyey
**2.** Waxa ay yihiin xaquuqdaada sharciyanka ah iyo waxa kula gudboon oo aad sameyn karto **iyo**
**3.** Barnaamijka Gargaarka Macmilka (CAP) iyo sida CAP laga yaabo inuu kuu caawin karo adiga



hadii SSB ay go'aansato in naafanimaada ay aad u ba'an tahay oo aadan xaq u lahayn adeegyada, waa inay ku siiyaan fursad aad ku marto la talin buuxda ka hor inta aysan ku diidin. Hadii laguu diido sababtan awgeed, waxaad leedahay 2 xaquuqood oo aasaasi ah:

1. SSB waxay dib u eegi codsigaaga sannad walba si ay eegto inaad xaq u yeelato mar kale ama

2. Racfaankaan ayaad ka qaadan kartaa diidmada markiiba.

Hadii barnaamijka SSB uu g'aansado inaadan xaq u lahayn adeegyada tababarka xirfadaha, waa khasab inay eegaan inaad xaq u leedahaya mid ka mid ah barnaamijyadooda kale sida is-meel marinta, is-daryeelida ama adeegyada xirfadaynta ilmaha.

## Mashruuca Gargaarka Macmilka (CAP)

Hadii aad tahay macmil ama codsade adeegyada hay'adaha VRS ama SSB, waxa aad wici kartaa Mashruuca Gargaarka Macmilka (CAP) si aad caawimaad uga hesho, hadii aad qabto su'aalo,walaac, ama ashtako ku saabsan adeegyada tababarada xirfadaha. Hay'ada (CAP) **ma bixiso** adeegyo tababaro xirfadeed ah oo toos ah, sida, tacliin, tababarid, ama qalab.

Eeg warqadayada xoga aruursan ee *Mashruuca Gargaarka Macmilka*
Wixii akhbaar ah ee kale ee ku saabsan (CAP) ama sida loo codsado adeegyada (CAP), ka wac:

- (612) 334-5970 (agagaarka beledyada)
- 1-800-292-4150 (gobolka oo dhan)

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2023 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**